

Ku Xadgudubka Dadka waa Wayn



Buug yarahan waxaa loo soo saaray dadka reer Alberta kuwa doonaya inay wax badan ka ogaadaan sharciga sida uu u quseeyo xadgudubka dadka da'da ah. Wuxuu ku siinayaa talo sharchiyeed. Haddii aad u baahan tahay macluumaad faahfaahsan, fiiri buug yaraha daabacan ama codso talo qareen.



Ha iskugu haleyn buugan yar talo sharciga ahaan.
Wuxuu ku siinayaa macluumaad guud oo ku sahabsan
kaliya sharciga Alberta. 2020

Iska fogeyn

Waxyaabaha buugan yar ka kooban yahay waxaa loo bixiyaa macluumaad guud ahaaneed oo kaliya. Ma aha talo sharci. Haddii aad qabto dhibaato sharci, waa inaad la tashataa qareen.

Macluumaadka uu ka kooban yahay buugan yari sax ayuu ahaa wakhtigii lasoo saarey. Ogsoonow in laga yaabo inay jiraan isbeddelo ku-xiga oo ka dhigaya macluumaadka mid wakhtigiisii dhaafey (dhacay) waqtiga aad akhrineyo. Xarunta Macluumaadka Sharciga ee Alberta Ltd. ma masuul kama noqon doonto wixii khasaare ah ee ka imanaya ku tiirsanaanta ama ficiil lasameeyo (ama aan la sameyn) taas oo ka dhalatay macluumaadkan.

Mahadnaq

Waxaan jeelaan lahayn inaan uga mahadcelino Hay'adda Sharciga Alberta iyo Waaxda Caddaaladda Canada bixinta maalgalinta hawlah-shaqa, taas oo suuro galineysa daabacadaha sida tan.

© Xarunta macluumaadka Sharciga ee Alberta Ltd., Edmonton, Alberta

Dib-eegistii u danbeysay 2020

Ka hawl-galeysa: Xarunta Waxbarashada Sharciga Dadweynaha ee Alberta

Photo Credit: ID 7496021 © Aniszewski | Dreamstime.com

Xarunta Macluumaadka Sharciga ee Alberta Ltd, oo ka hawl galaysa Xarunta Waxbarashada Sharciga Dadweynaha Alberta, waa urur aan faa'iido doon ahayn oo hadafkiisu yahay inuu dadka ka caawiyo inay fahmaan sharciga maadaamoo uu saameynayo noloshooda maalin walba.

Waxaanu soo saarnaa buug yar oo ku qoran luqad fudud, bandhigyo, iyo qalab waxbarasho oo kale si dadka looga caawiyo inay aqoonsadaan oo ay uga jawaabaan xuquuqdooda iyo waajibaadkooda sharci. Waaan leendhay barnaamijyo kala duwan, waxaanna bixinnaa macluumaad sharci ah iyo gudbin ku saabsan mawduucyo sharci oo badan. MAcluumaad dheeri ah, Fadlan booqo www.cplea.ca.



#800, 10050 112 Street
Edmonton, Alberta T5K 2J1

Phone 780.451.8764

Fax 780.451.2341

Email info@cplea.ca

Web www.cplea.ca

Tusmada

Waa maxay Xadgudub waayeelku?	4
Xadgudub jidheed	5
Xadgudub Dareen	6
Xadgudub Dhaqaale	7
Xadgudub Galmo	8
Dayacaad iyo is-dayicid	9
Ka hadlida Xadgudubka	10
Soo sheegista Xadgudubka	11
Joojinta Xadgudubka	12
Xeerka ka hortaga xalada degdega ah (EPO)	13
Xeerka ka horta e Queen's bench (QBPOs)	14
Amarada Lahaanshaha Gaarka ah	14
Amarada Xakameynta (RO)	15
Amarada Amaansiinta	16
Macluumaad	18

Waa maxay Xadgudub waayeelku?

Qadka Taageerada

Xadgudubka Dadka

Waaweyn

780.454.8888 (24

Saacadoo)

Khadka Macluumaadka

Rabshadaha Qoyska ee

Alberta

Macluumaadka

kheyraadka ee
degaankaaga.

Wicitaan Bilaash ah.

780.310.1818 (24

Saacadoo)

Taleefanka Xarunta

Ku Xadgudubka

Waayeelka ee Calgary

403.705.3250

Hadii aanad awoodin

looyar, ka wac adeega
xalinta iyo maamulka
maxkamada bilaash

1.855.738.4747 ama

bookho shabakadooda

www.rcas.alberta.ca

Xadgudub waayeelku waa ficijkasta ama ficijl la'aan loosameeyey (ama aan loo sameyn) u jeedo wax lagu yeelayo qof weyn. Waxyeeladu waxay noqonkartaa mid jidheed, dareen, jinsi, maskaxeed, dhaqaale, ama isku jirka wax-yaabahan. Dayacaada qof-weyn iyadoo waxba loo qabaneyn waxay la mid noqon kartaa waxku dhufasho ama wax-yeelid qof-weyn jidh/jismi ahaan.

**Waxaa laga yaabaa inaad dareentid baahida loo
qabo in carruurtaada, xaaskaada ama xubno kale oo
qoyskaaga ka la ilaaliya, xitaa haddii ay ula dhaqmaan
si xun, laakiin dabeecada xadgudubku maaha mid
caafimaad kuu leh adiga ama qofka kugu xadgudbay.
Ma jiro qof u qalma in lagu la dhaawaco.**

Saxiib, qaraabo ama daryeеле dhow ayaa badanaa sababa xadgudubka waayielka. Waa xanibitaanka dabeecad. Xadgudubku iskama istaago. Hadii la iska dhago tiro, xadgudubku wuu sii soconayaa waxaana lagayabaa inuu sii xumaado.

**Hadii aad tahay
qof waayeel ah oo
waajahaya xadgudb,
MAAHA
QALADKAAGA!**

Xadgudub jidheed

Xadgudub jismil/jidheed waxa sababa gaadhsiinta wax-yeelo jidheed qof weyn.

Xadgudubka jidheed wax aka mid ah dhaqamada sida:

- ku dajin/seexinta qof dawo ka tan badan;
- Dwoooyin yar siin qofka marka daawooyinka loogu baahan yahay dhibaatooyin caafimaad;
- Hadal u diidid ama inaan la siin cunto ku filan;
- Si ula kac ah u dhigid/gayn cimilo adag; ama
- Xanibaad jidheed mudo dheer.

Calaamadaha Xadgudubka jidheed:

- Calaamado ama dhaawac jidheed oo aan la sharxi karin (ama meesha sharaxaadu u muuqato mid aan suurto gal ahay);
- Dhacdacyo/kufis soo noqnoqda;
- Daryeel caafimaad oo laga raadsado dhakhaatiir ama rug caafimaad oo kala duwan;
- dhaawacyada aan helin daryeel caafimaad oo sax ah;
- Dib u dhigista daaweynta;
- Jahwareer ama daal aad uga badan oo ka yimaada daawooyinka ka tan badan;
- Dhibaato sii socota oo ka timaada xaalad caafimaad oo ka dhalatey dawo yaraan;
- Lumin dhaqdhaqaaq oo ka dhalatey xanibaad;
- Niyad-jab;
- Calaamado cabsi xubnaha qoysaska qaarkood, asxaabta, ama daryeelayaasha;
- Albaabo soo xidhasho;
- Isku xidhid meelaha cuntada lagu keydiyo; ama
- Calaamado alaabta guriga oo aan caadi ahayn oo ka yimaada xanibaado.



Xadgudub Dareen

Xadgudubka dareen ama maskaxeed waxa ka mid noqon kara:

- Ugu hanjibid inuu qofka waayeelka ahi qabto shay ama ku sameeyo shay ama qof wax qof qofku daneeyo;
- Dhibaato maskaxeed;
- bahdilaad;
- Qasbid go'doomin ama dadku qasbid;
- ula dhaqmid qofka-waayeelka ah sida ilmo yar; ama
- U diidid qofka weyn inuu isagu go'aan gaadho.



Calaamadha Xadgudubka Dareen:

- Calaamado cabsi xubnaha qoysaska qaarkood, asxaabta, ama daryeelayaasha;
- Ka noqoshada, dabacsanaanta, walaac, welwelka, daneyn la'aan, ama niyad-jabka iyada oo aan wax sababoo cadi jirin;
- Shaki/argagax ama cabsi aan la garaneyn;
- calaamada godoomin jidheed;
- Miisaan helid/waayid aan caadi ahayn;
- Diidmo in uu u hadlo cad;
- Sameynta hadalo aan iswaafaqsaneyn
- Sugitaan in daryeeluhi ka jawaabo su'aalaha;
- Isbedelada dabeeecado la dareemi karo oo ay ka mid yihiiin iska ilaalinta eegista;
- Kal-sooni doro;
- Ay ku adag tahay seexashadu ama u baahan hurdo badan;
- U sameyn cudur-daaro soo ka go'itaanka bulshada;
- Aad la iskaga indho tirey, si caajisnimo loola dhaqmey, ama sida caruurta uu ula dhaqmey daryeele.

**Ku dhiirri geli dadka waaweyn in ay ilaaliyaan shabakadahooda
asxaabta si ay uga hortagaan go'doominta.**

Xadgudub Dhaqaale

Xadgudub dhaqaale wax aka mid noqon kara:

- Xadid lacag, wax-yaaba aad leedahay, kaadhadhka lacagta, ama jeegaga hawl-gabka;
- khasbid qof weyn inuu sameeyo ama badelo awooda qareenka, warqada awooda qareen ama Dardaaran;
- ku sameynta saxeex been ah jeegaga gaarka ah ama warqadaha sharciga ah;
- Udiidista lacag qofka waayeelka ahi u baahan yahay;
- Ku qancin qof weyn inuu maal-gashadu maalgashi khiyaano ah;
- Ku caadidin qof weyn inuu bixiyo adeeg bilaa lacag ah;
- ku khasbid, dhaadhicin ama kхиyaamid qof-weyn inuu iibyo guri ama wax-yaabah uu leeyahay, ama inuu bixiyo adeeg aan daruuri ahay; ama
- Xadgudubid awooda qareenka, masuulnimada, ama masuuliyadaha siihaynta-alaabaha.

Calaamadaha Xadgudub dhaqaale:

- jahwareer ku sahabsan dhaqaalahooda gaarka ah;
- saxeexid warqad iyadoon loo sheegin cawaaqibteeda;
- ku guu- dareysasho sameynta akhtyaar/go'aamo dhaqaale;
- Xubnaha qoyska oo kusoo guuraya bilaa hesiish ama la wadaageyn kharashaadka;
- Waajihad sameynta dhaqdhaqaaq bangi ama ATM oo aan caadi ahayn iyadoo la matalayo;
- bilaabid muujinta farqiga u dhaxeeya dakhliga iyo heerka nolosha;
- Wax-yaabaha aad leedahay ood weydo;
- dhibaato lama filaan ah ama aan la garaneyn oo ka dhanka bixinta biilalka ah; ama
- Diidmo isticmaalka lacagta heshiis daryeele la'aantii.

**Kooxda faro-galinta Xadgudubka
Waayeelka**

Dadaal wada shaqeyn ka kooban Adeega bulshada Kaatooliga, bileyska Edmonton iyo Adeega Bulshada magaalada Edmonton.

Bixinaya qiimeyn, macluumaad iyo faro-galin toos xaalada xadgudubka waayeelka.

780.477.2929

Qadka Taageerada
Xadgudubka Dadka
Waaweyn

780.454.8888
(24 Saacadood)

Khadka Macluumaadka
Rabshadaha Qoyska ee
Alberta

Macluumaadka
kheyraadka ee
degaankaaga.
Wicitaan Bilaash ah.

780.310.1818
(24 Saacadood)

Taleefanka Xarunta
Ku Xadgudubka
Waayeelka ee Calgary
403.705.3250

afaqo-daro waa
la'aanta nafaqo
ku habboon, oo ay
sababtey la'aanta
cunto ku filan ama
cunis la'aanta cuntada
saxda ah.

Xadgudub Galmo

Tusaalayasha zadgudub galmo wax aka
mid ah:

- Khasbid xidhiidh afka ah sida dhunkasho;
- Taabasho ama salaaxid;
- Xidhiidh xubnaha taranka ah;
- Galmo afka ah;
- Galmo Xubinta taran haweenka ama
dabada; ama
- Khasbid daawasho filmaanta dhaqan-
xumada ah.

Xadgudub galmo wuxuu noqon kara rabshad ama khasab.
Khasabku kuma luglaha awood toos ah. Wuxuu dhacaa marka qof
isticmaalo kaantarool, cadaadis, ama hanjabaado si uu ugu kalifo
inuu sameeyo waxaanu rabin inuu sameeyo.

**Xidhiidh galmo oo
kastoo aan la rabin
waa xadgudub
galmo.**

Calaamada Xadgudubka Galmo:

- Xanuun, dhiig, ama diif xubnaha taranka ama meela kale oo
jidhka ah;
- Niyad-jab;
- Astaamo baqdin, jeelaan kali-ahaansho, walaac, ama
dabacsanaan;
- Seexasho in ka badan am aka yar inta caadiga ah;
- Aaminaad la'aan dadka kale;
- Yeelasho la qabsi maandooriyayaasha iyo alkahoosha;
- Xasuus hore oo degdeg ah;
- ku hawla'aan dhaqamo wax isyeelis; ama
- Waayid kalsooni.

Dayacaad iyo is-dayicid

Dayacaada waxa ka mid noqonkara:

- Ku guul-dareysasho siinta dhar ku filan, cunto ku filan, dawo ku filan, daryeel ku filan, nadaafad, daryeel caafimaad ama dhaqdhaqaaq bulsho;
- geyn qofka waayeelka ah meel aan amni ahayn ama deegaan go'doonsan

Dayacaadku wuxuu noqon karaa mid ula kac ah ama aan ula kac aheyn. Dayacaad ula kaca ahi waxay dhici kartaa marka daryeel bixiyuhu uusan bixin waxyaabaha daruuriga ah sababtoo ah la'aan xirfad, maclumaad ama daneyn.

Waxa muhiim ah in la kala saaro dayacaad uu sababey qof kale iyo is-dayacid uu sababey qofka waayeelka ah isagoon is daryeelin.

Marka qof maskaxiyan awood leh uu doorto inuu ku noolaado xaalad is dayacis ah, way adkaan kartaa inuu la caawiyo. Xaaladkasta oo guud, dadku waxay xaq u leeyihii inay u noolaadaan sida ay rabaan ilaa iyo inta aanay dembi galin ama khatar gelinayn dadka kale.

Calaamadaha dayacaada

- Calaamadaha jidhee nafaqo xumada sida dibno qalaan, jidh cadcadaan ah ama miis dhac faro badan;
- Muuqaal aan habeysaneyn ama xidhasho dhar aan ku haboineyn cimilada;
- Waayid daawooyin loo baahan yahay, qalabka, qalabka ilkaha, caawimada maqalka, caawimada dhaqdhaqaaqa, ama muraayadaha;
- maydhasho yar ama nadaafad xumo;
- Kaadi xajis la'aan;
- hoos u dhac maskaxeed ama jidheed bilaa sabab caafimaad;
- Xanibaad/xidhis;
- Iska socosocod khatar ah;
- Cunto la'aan; ama
- Heerarka Karinta ama hagajinta guriga oo sababi kara shil ama xanuun.

Ka hadlida Xadgudubka

Markaad ogaato calaamadaha xadgudubka waxa muhiim ah inaad ka hadasho dhamaan nijooinka suurtogal ah ee faro-galinta ama ku luglahaanshaha lagu xadgudubaha.

jira sababo badan oo aaney dadku usoo sheegin xadgudubka:

- ka xishood in xubin qoyska ka mid ahi ula dhaqanto qofka si xun sidaas daraadeedna uu u qariyo xadgudubka;
- Ka baqid in xaalandu sii xumaato, oo sababeysa xadgudub sii bata;
- Ka cabsasho in la geeyo haayad;
- cabsi in uu eegi kari waayo daryeelaha ama xubin qoyska ah;
- Aaminaad inuu ku dhacayo waxay u qalmeen;
- or aaminaad in booliska ama addeegayada bulshadu aaney caawin Karin; ama
- Aaminaad inaaney cadeyn Karin in xadgudubku dhacayo.

Waa muhiim in qofka weyni uu ku raacsan yahay ficio kasta oo la qaado, ilaa qofka weyni uusan maskax ahaan awoodin. Ka taxadar in aad wax ka qabatid kiisaska looga shakisan yahay xad-gud maxaayeelay xadgudbuuhu wuxuu uga fal celi karaa si taban/xun. Sidoo kale, xasuuso inaad ixtiraamto sharafta qof weyn kaasi oo dooran kara inuu aqbalo ama diido caawimadda.

Iyadoo ay ku xidhan tahay shakhsiga, waxaad kala hadli kartaa qofka weyn xadgudubka adigoo:

- si toos ah ama ixtiraam leh u weydiinaya in xadgudubku dhacayo;
- ku dhiiri galinaya in ay la xidhiidhaan dadka kale sida dhakhta, looyar, ama shaqaale bulsho;
- aqoonsashada faa'iidooyinka ka caawin kara inay noqdaan kuwa madaxbannaan;
- bixinta maclumaadka adeegyada la-talinta ee loogu talagalay lagu-xadgubaha ama xad-gubaha;
- sharaxida in ilaalinta sumcadda qofka xadgudubka geystay ayna joojin doonin xadgudubka;
- Ku dhiirigelinta isticmaalka adeega bulshada sida xarumaha la booqan karo bilaa balan; ama
- Ka caawinta sameynta ballan si aad u hesho qiimeyn caafimaad.

Soo sheegista Xadgudubka

Ma jiro gaf dembiyed oo gaar ah oo ah “gabood-fal waayeel.” Si kastaba ha ahaatee, waxaa jira falal dambiyo oo khuseeya qaababka kala duwan ee xadgudubka waayeelka.


Inta badan sharciga dembiyada waxaa lagu dejiyey Xeerka Ciqaabta, kaas oo khuseeyo dhamaan gobolada iyo dhulalka ee Kanada.

Xeerka ciqaabta:

- Dhibaato la geysan karo iyadoo la isku dayayo ama loogu hanjabayo in loo isticmaalo xoog qof kale hadii qofka kale aaminsan ayahy in xadgudbuuhu leeyahay awooda fulinta falkaasi;
- Waxyeelo ay ka mid tahay dhaqamo hanjabaad loo geysto qof kale taasi oo qofkaasi abnigiisa u cabsanayo;
- Hanjabaad ay ka mid tahay in qofku si ula kac ah u yidhaahdo, usoo gudbiyo, ama ku sababo qofkasta oo lagu khatar galinayo:
 - Dil ama waxyeeleyn jidhka qofka;
 - gubid, burburin, ama waxyeeleyn hanti; ama
 - In la dilo, sumeeyo, dhaawaco xayaan ama shinbir uu leeyahay dhibanuhu.

Waxaad booliska u soo sheegi kartaa dembiga xitaa haddii aadan si toos ah ugu lug lahayn.

Haddii aad rabto in boolisku ay baadhaan suurtogalmimada in si xun loola dhaqmo waayeelka, waa inaad ku “xaraysid macluumaadka” saldhigga bilayska. Tani waa bayaan sheegaya xadgudubka aad rumeyasantahay in uu dhacayo waxaana lagu dhaarinayaan ama lagu xaqiijinayaan dhaarta caddaaladda horteeda ama garsoorka. Boolisku waxay markaa baarayaan xaaladda waxayna go'aaminayaan haddii ay haystaan caddayn ku filan oo ay ku soo oogaan qofka xadgudubka geystay fal dambi.



Qeybaha adeegyada shruucda alberta ee ka ilaalinta dadka waaweyn xadgudubka. Warbixin dheeri ah waxa laga heli karaa:

www.oaknet.ca

<https://www.cplea.ca/ABLawsElderAbuse.pdf>

Joojinta Xadgudubka

Faafaahin dheeraad ah:

- Xeerka ka hortaga
- Xeerka ka hortaga
Queen's Bench

Bookho:

[https://www.cplea.ca/
DomesticViolenceSeries](https://www.cplea.ca/DomesticViolenceSeries)

Madbacada Daabacaada Alberta Queen

Si aad u hesho elektiroonig bilaash ah iyo nuqulo xeerar ah oo daabacan ama shuruuc ah booqo:

www.qp.alberta.ca

Iyadoo ay ku xiran tahay degdega xaalada iyo xiriirka ka dhexeeya xadguduba iyo qofka waayeelka ah, waxaa jira noocyoo kala duwan oo amarada maxkamada si looga joojiyo xad-guduba in uu la xiriiro qofka weyn.

Xeerarka Ka hortaga

Alberta, waxaa jira sharci loo yaqaan "Ka hortaga rabashada qoyska." Sharcigaan wuxuu u siinaya habka xubin qoyska ka mid ah oo la kulma xadgudub, bileyksa, ama qof kale oo la socda ogolaanshaha qofka lagu xadgudbey uu ku dalbanayo Xeerka ka hortaga.

Xeerarka ka hortaga waxa la bixiyaa marka xubinaha qoysku ay la waajahayaan rabshado qoys.

Rabshadaha qoyska wax aka mid ah:

- Falkasta ama fal-la'aankasta oo sababaya dhawaac ama burbur hanti oo cabsi galinaya ama waxyeelaya xubinta qoyska;
- Falkast ama fal hanjabaad kasta oo cabsi galinaya xubinta qoyska iyaadoo uu abuurayo cabsi waxyelo hanti macquul ah ama dhaawac xubin qoyska ka mid ah;
- Meel ku xidhid khasab ah;
- xadgudub galmo; ama
- Dabo-gal.

Xubin qoyska tirsan macneheedu waxa weeyi:

- xaas/say hada amah ore;
- Xidhiidh lamaane waayeel hore ama hada;
- Qof aad hada kula nooshahay amah ore ugula nooleyd xidhiidh dhow;
- Waalidka ilmahaaga (xataa hadii aanu xidhiidh idinka dhaxayn ama aydaan wada nooley);

- Qof aad wadaagtaan dhiig, guur ama korsiimo ama maxayeeley xidhiidh lamaane waayeeel;
- caruurtaada ama caruurta kale eed daryeesho;
- Qof aad la nooshahay oo midkiin ka kale daryeelo ama masuul ka yahay (sida amar masuulnimo ama sii-hayn).

Waxa jira labo nooc oo xeer ka-hortaga:

- 1. Xerka kahortaga xaalada degdega ah (EPO);**
- 2. Xeerka ka hortaga ee Queen's bench.**

Xeerka ka hortaga xalada degdega ah (EPO)

Xeerkan waxaa lagu bixiyaa xaaladaha degdega ah wakhti kasta (24 saacadood maalintii, 7 maalmood asbuucii). Waxaa bixiya maxkamada cadaaladda ama garsooraha maxkamadda gobolka.

EPO wuxuu inta badan sheegaa in qofka xadgudubka geystay uusan la xidhiidhi karin dhibbanaha oo aan u tagi karin meelo gaar ah oo uu dhibbanuhu si joogto ah u utago. EPO waxay sidoo kale siin kartaa qofka dhibbanaha ah hoy khaas ah haddii qofka xadgudubka geystay iyo qofka xadgudubka geystay ay wada nool yihiin.

Marka EPO ay soo saarto Maxkamada, nuqulka amarka waxaa la siin doonaa qofka xadgudubka geysta, sida caadiga ah waxa bixiya booliska ama adeegsade nidaamka. Marka xad-gudbaha uu haysto koobiga EPO, qofka xadgudubka geystay waa inuu u hoggaansomu amarka. Haddii qofka xadgudubka geystay uusan u hoggaansomu amarka, qofka xadgudubka loo geystay wuxuu la xiriiri karaa booliska.

EPO waxaa dib loo eegaa sagaal maalmood oo shaqo gudahood kadib marka la siiyo. Waqtigaas, amarka waa la tirtiri/joojin karaa ama la xaqijin karaa ama QBPO ayaa lasoo saari karaa badelkiisa.

Si aad u hesho EPO, la xidhiidh booliska degaankaaga ama hay'adda adeegyada dhibbanaha. Alberta, waxaad sidoo kale la xiriiri kartaa Barnaamijka Gargaarka Degdegga ah ee xeerka ka hortaga ee **Caawinta Sharciga ee Alberta** si aad u hesho talo iyo caawimo bilaash ah.

Talooyin ama caawimada EPO-ka Alberta, la xidhiidh:

Caawimada Sharciga Alberta

wicitaan bilaash ah: 1.866.845.3425

<http://www.legalaid.ab.ca/help/Pages/Emergency-Protection-Orders-Domestic-Violence.aspx>

Xeerka ka hora e Queen's bench (QBPOs)

QBPO waxay la mid tahay EPO laakiin waxaa la bixiyaa xaalado aan degdeg ahayn. Qofka xadgudubka geystay waa inuu helo ogeysiis ah in qofka xadgudubka loo geystay uu codsanayo QBPO. QBPO waxaa bixiya Maxkamada Cadaalada Queen's bench ee Alberta. Waxay taali kartaa meel hal sano ah oo dheeraad ah haddii loo baahdo.

A QBPO wuxuu awoodaa:

- Sheeego inaanu xadgubuhu la xidiidhi Karin dhibanaha oo aanu tagin karin meelaha uu qofka lagu xadgudbay badanaa tago;
- siiyo hoy gaar ah qofka lagu xadgudbey;
- siiyo lahaansho gaar oo hanti shakhsiyadeed qof kaliya, sida gaadhi, warqado kaadhadh aqoonsi, kaadhadh abngi, furayaal, iwm; iyo
- Ubaashada in xadgubuhu u madhabo khasaaraha lacageed ee qofka dhiban ka cabanayo sida khasaare dakhli, caafimaad ama kharaash ilkeed, kharaashadka guuritaanka iyo degitaanka, kharashaadka sharciga iyo kharashka codsashada QBPO-ga.

Marka QBPO ay soo saarto Maxkamada, nuqlka amarka waxaa la siin doonaa qofka xadgudubka geysta, sida caadiga ah waxa bixiya booliska ama adeegsade nidaamka. Marka xad-gudbaha uu haysto koobiga QBPO, qofka xadgudubka geystay waa inuu u hoggaansomu amarka. Haddii qofka xadgudubka geystay uusan u hoggaansomu amarka, qofka xadgudubka loo geystay wuxuu la xiriiri karaa booliska.

Amarada Lahaanshaha Gaarka ah

Amarka lahaanshaha gaarka ah waa amar maxkamadeed oo hoos yimaada Sharciga Sharciga Qoyska ee Sharciga Qoyska ama Sharciga Hantida Guurka kaas oo ku siin kara lahaansho gaarka ahe guriga guurka ma qoyska.

Maxkamad ayaa ku amri karta xaaskaaga / saygaaga ama lammaanaha in ay banneyaan guriga waxaana laga rabaa inay joojiyaan galitaanka ama tagitaanka guriga. Amarka lahaanshaha gaarka ah ayaa sidoo kale ku siin kara lahaanshaha gaar ahe gaadiidka qoyska, xayawaanka rabaayada ah iyo alaabada kale ee gurigaaga laga yaabo inaad ugu baahato.

Amarada Xakameynta (RO)

Amarka Xakameynta waa nooc xidhiidh la'aan ah oo ay soo saartay cadaalada maxkamada Queen Bench ee Alberta oo u baahan qof in uu kaa fogaado. Wuxaad RO ka codsan kartaa qofkasta oo dabeecadiisu kugu sababeyso inaad ka ubaqato nabadgeleyadaada. Tani waxaa ku jira rabshada qoyska.

RO waxaa la codsan karaa oo keliya inta lagu jiro saacadaha caadiga ah ee maxkamadda. Xaaladda degdegga ah, RO waxaa la siin karaa iyada oo aan ogaysiis la siin qofka xadgudubka geystay. Xaaladahan, RO waxaa caadi ahaan dib loo eegayaa 2 asbuuc gudahood si qofka xadgudubka geystay uu uga jawaabi karo eedeymaha.

Xaaladda aan deg-deg ahayn, ogeysiinta codsiga RO waa in la siyyaa qofka xadgudubka geystay, kuwaas oo markaa dooran kara inay ka soo qayb galaan codsiga maxkamada oo kaga hadlaan amarka laga codsaday aragtidooda. Waa fikrad wanaagsan in aad qabsato qareen si uu kaaga caawiyo inaad codsato kuguna matalo maxkamada.

Hadii aanad ku haoobeyn EPO ama QBPO, waxa lagayaaba xeerka xakameynta ayaa kuu fiican.

ROs waxay kaga duwan yihiin amarada ka hortaga (EPOs iyo WBPOs) labo hab:

- kuma koobna xubnaha qoyska; iyo
- waxay kaliya ka hortagaan xiriirka ka dhixeeeya dadka.

RO kama saari karo qof ka yimid meel uu xaq u leeyahay in uu ku noolaado. Amarka ka hortaga oo kaliya ayaa sidan samayn kara.

Faahfaahin dheeraad ah oo ku sahabsan:

- Xeerka Iahaanshaha gaarka
- Xeerka xakamaynta

Bookho:

[https://www.cplea.ca/
DomesticViolenceSeries](https://www.cplea.ca/DomesticViolenceSeries)

Hadii aanad awoodin looyar, ka wac adeega xalinta iyo maamulka maxkamada bilaash

1.855.738.4747 ama
bookho shabakadooda
www.rcas.alberta.ca

War-bixin dheeraad ah oo ku sahabsan:

- Xeerka amaansiinta bookho:
[https://www.cplea.ca/
DomesticViolenceSeries](https://www.cplea.ca/DomesticViolenceSeries)

Maxkamadaha Alberta:

www.albertacourts.ca

RO waxa ku jira shuruudo gaar ah oo sheegaya in ay tahay inuu qofku kaa fogaado oo aqoonsaya meelo gaar ah oo qofku aanu ka qayb gali karin ama isku dayi karin inuu kaala soo xidiidho. Xaalad kasta, garsoorka ayaa bixinaya amarka go'aaminaya shuruudaha gaarka ee amarka iyo mudada uu shaqeynayo. Waxaad ka codsan kartaa ama usoo jeedin kartaa shuruudaha garsooraha, lakiin garsooruuhu uma baahna inuu aqbalo codisaaga ama soojeedintaada.

Aad ayey muhiim u tahay in lagu daro ereyga siinaya booliska awooda in ay xidhaan qofka xadgudubka geystay haddii amarka la jabiyo. Tani waxaa la yidhaahdaa qawaaniinta dhaqangelinta bilayska. Haddii RO uu ku jiro qodobkan, markaa RO waa inuu ka diiwaan gashan yahay booliska. Haddii qofka xadgudubka geystay uu isku dayo inuu la xiriiro xadgudubka ama jebiyo amarka, booliisku wuxuu awood u yeelanayaa inuu soo xidho.

Kaliya inuu amarku kuu diyaar yahay ma damaanad qaadeysa amaankaaga. Waa inaad taxadirtaa. Qaado nuqlu RO ah wakhtiyadoo dhan si aad u awoodo inaad tusto masuulkasta sida booliiska, kaas oo qaadi kara talaabada ku haboon markaas ee xidhitaanka xadgudubaha.

Amarka Amaansiinta

Amarka amaansiintu waa nooc amar amaan-galin ah oo uu soo saaro garsoorka maxkamada danbiyada. Waxa lasoo saari karaa labo xaladood oo kala duwan:

- marka qof geystay danbi yar; ama
- Marka ay suurto gal tahay inuu qof galoo danbi yar lakiin aani jirin sababo lagu aamino in danbiga la galay.

Garsooruuhu wuxuu amri karaa in ku eedaysanaha xadguduku:

- Nabadjelyada ilaaliyo oo aan lagu soo oogin dembiyo kale illaa hal sano;
- Ka fogaado aqalkaaga, goobta shaqada iyo meelaha kale ee aad inta badan aadeysa;

- joojiso inaad la xiriirto, qof ahaan, boostada ama emailka, telefoonka, iwm.
- joojiyo isticmaalka khamriga ama daroogada;
- si joogta ah u wargaliyo booliska ama sarkaalka kormeerka; ama
- La socdo bandoow.

Codsashada Bixinta Nabadjelyo waxay u baahan tahay dhagaysi maxkamadeed. Waxaa jira laba siyaabood oo lagu codsan karo dhagaysi maxkamadeed:

U tag booliska. Boolisku waxay waydiisanayaan Xeer Ilaaliyeha inuu dalbado amarka aamsiinta isagoo ku matalaya.

Haddii boolisku aysan oggolaanin inaad sii wado, waxaad si toos ah u aadi kartaa Maxkamada Gobolka Alberta oo waxaad la hadli kartaa waaxda cadaalada.

Qofka xadgudubka geystay waa inuu udiyaar garoobaa inuu maxkamada yimaado oo bixiyo caddayn si uu u muujiyo in ay jiraan sababo macquul ah oo looga baqayo in qofka xadgudubka geystay uu keeni karo dhaawaca shakhsii ahaaneed ama waxyeelo u hanti. Garsooraha ayaa go'aamin doona haddii amarka amaansiintu ku habboon yahay.

Waxaa jiri kara tallaabooyin kale oo geedi socodka ah. Booliska ayaa laga yaabaa inuu wareysto qofka xadgudubka geystay iyo inuu sameeyo baadhitaan. Way eedeyn karaan ama xiri karaan qofka la soo eeddeeyay. Wuxuu gal ah in ay weydiyaan qofka xadgudubka geystay in uu ogolaado shuruudaha Nidaamka amarka amaansiinta.

Marka amarka amaansiinta ay soo saarto Maxkamaddu, haddii qofka xadgudubka geystay uusan u hoggaansamin, waa la soo eedeyn karaa oo lagu xukumi karaa dambi.



**Xeerka amaansiinta
looma isticmaali
karo in lagaga
badbaadiyo
dareenka ama
dhaqaalaha xadgud.**

**Xeerk Amaansiintu badanaa lama tacaalo xaaladaha degdega ah
maxaayeeley waxa jiri kara dib u dhac labo ama saddex bilood laga bilaabo
taariikhda codsiga ilaa taariikhda dhageysiga.**

Macluumaad

Dawlada iyo Adeeyada Maxkamadaha

Maamulka Alberta

www.alberta.ca

Resolution and Court Administration Services (RCAS)

Qanuunada iyo Adeegyada Taageero ee Alberta

La xidhiidh xarunta: 1.855.738.4747

<https://www.alberta.ca/rcas.aspx>

Caawimada Alberta

Hel in ka badan 30 barnaamij iyo 120 adeeg bulsho.

Bilaash ku wac: 1.877.644.9992

Xafiiska Daryeelka dadweynaha iyo Amaanada

Adeegyada iyo caawimada dadka Alberta ee jilicdasan iyo qoysaskooda.

Bilaash ku wac: 310.0000 then 780.422.1868

www.alberta.ca/office-public-guardian-trustee.aspx

Adeegyada Sharciga

Adeega Sharci yaqaanada looyerada Alberta

Waxay bixisaa magacyada saddex looyer. Loorkastaaba wuxu bixiyaa saacad badhkeed oo la tali bilaash ah.

Bilaash ku wac: 1.800.661.1095

<https://www.lawsociety.ab.ca/public/lawyer-referral/>

Caawimada Sharciga ee Alberta

Bilaash ku wac: 1.866.845.3425

www.legalaid.ab.ca

Shaybaadhka Edmonton

Shaybaadhka Edmonton. Saacadaha wicitaanka iyo ku haboonanta.

780.702.1725

www.eclc.ca

Hagitaanka Sharci ee Calgary Legal

Shaybaadhka Calgary. Saacadaha wicitaanka iyo ku haboonanta.

403.234.9266

<http://clg.ab.ca>

Shaybaadhka Bulshada- Central Alberta

Shaybaadhka Alberta. Saacadaha wicitaanka iyo ku haboonanta.

Central Alberta: 403.314.9129

Fort McMurray: 587.674.2282

Lloydminster: 587.789.0727

Medicine Hat: 403.712.1021

www.communitylegalclinic.net

Hagaha Sharci ee Grande Prairie

Shaybaadhka Grande Prairie Saacadaha wicitaanka iyo ku haboonanta.

780.882.0036

www.gplg.ca

Hagaha Sharci ee Lethbridge

Legal clinic in Lethbridge. Saacadaha wicitaanka iyo ku haboonanta.

403.380.6338

<http://www.lethbridgelegalguidance.ca/>

Macluumaad

Ilaalinta Dadka daryeelka ku jira

Soo sheeg xadgudubyada waayeelka ka helaya daryeel ama caawimo adeega dadweynaha ku deeqeen.

Bilaash ku wac: 1.888.357.9339

www.alberta.ca/report-abuse-to-protection-for-persons-in-care.aspx

Shabakada Aqoonta Dadka waayeelka ah

Macluumaad sharci oo ku sahabsan dadka waayeelka ah.

www.oaknet.ca

Midowga ururka sare ee Edmonton (SAGE)

780.423.5510

www.MySage.ca

Xarunta Kerby (Calgary)

403.265.0661

[https://www.kerbycentre.com/](http://www.kerbycentre.com/)

Xarunta macluumaadka ee Golden Circle Senior Resource Centre (Calgary)

403.343.6074

www.goldencircle.ca

Ku Xadgudubka Dadka waa Wayn

Buugani waa mid ka mid ah daabacado badan oo ay soo saartay Xarunta Waxbarashada Sharciga Dadweynaha ee Alberta. Dhamaan daabacaadaha waxa si bilaash ah loogala degi kara iyadoo la bookhanayo www.cplea.ca/publications or www.cplea.ca/store

Daabacadaha kale ee la xiriira mawduucaan ee laga yaabo inaad daneyneso wax ka mid ah:

- Dardaarmid
- Sameynta Warqada Ogalaanshaha Wakiilka
- Sameynta Warqada Ogalaanshaha Qareenka
- Noqoshada Wakiil
- Noqoshada Wakiil Shakhsi
- Noqoshada Qareen ku xusan Warqada Ogalaanshaha Qareenka
- Awoodaha Guud Qareenka
- Xeerka Masuulnimada iyo Amaanada
- Ayey/Awow iyo Caruurgaada
- Xadgub Waayeel

Waxa Mahadnaq gaar ah iska leh ururka Sharciga Alberta iyo laanta cadaalada Kanada bixintooda kharashka hawl-galka, oo suurto galiya daabacaadahan oo kale.



Department of Justice
Canada

Ministère de la Justice
Canada



We want to know what you think!

Take our one-minute survey

Capture this QR code with your phone camera or go to <https://bit.ly/2TgYzTk>

Phone [780.451.8764](tel:780.451.8764)
Fax [780.451.2341](tel:780.451.2341)
Email info@cplea.ca
Web www.cplea.ca



Ha iskugu haleyn buugan yar talo sharci ahaan.
Wuxuu ku siinayaan macluumaad guud oo ku sahabsan
kaliya sharciga Alberta. 2020